

Talooyin loogu talagalay waalidiinta buuxinaya qiimaynta PCA-ga/CFSS ee Qiimaynta Xulashada MN

Kheyraad loogu tala galay waalidka

(Tips for parents completing a PCA/CFSS evaluation through MN Choices Assessment- Somali translation)

Laga bilaabo Oktoobar 1, 2024, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) waxay shakhsiyadka isticmaala Adeegyada Caawinta Daryeelka Shakhsi ahaaneed ee loo yaqaan (Personal Care Assistance PCA) iyo Deeqaha Taageerada Macmiilka ee lo yaqaan (Consumer Support Grant CSG) u wareejin doontaa Adeegyada iyo Taageerada Koowaad ee Bulshada oo loogu yeeri doono (Community First Services and Suprts CFSS). Lama beddeli doono habka lagu ogaanayo tirada saacadaha uu ilmuu helo. Talooyinka soo socdaa waxay qeexayaan sida loo helo natijada ugu fiican ee adeegyada PCA ama CFSS ee ilmahaaga. Wixii maclumaad dheeraad ah ee ku saabsan kala guurkan, booqo bogga DHS website.

Sidee saacadaha PCA-ga/CFSS loo go'aamiyaa?

Adeegyada PCA-ga/CFSS waxay ku salaysan yihii awood la'aanta ilmaha ama da'yarta inay qabtaan hawlo nolol maalmeedka iyaga oo aan gargaar helin; marka la soo gaabiyana loo yaqaan ADLs (activities of daily living). Haddii gargaar loo baahdo, markaas ilmaha waxaa loo arkaa inuu ku tiirsan yahay hawshaas.

Wa maxay xarakaadka nolol maalmeedka?

ADLs waxaa ka mid ah labiska, qubayska, musquusha, quudinta, dhaqdhaqaaqa, wareejinta, iyo is daryeelka nafsadeed.

PCA-ga/CFSS caqabadaha dhaqanka adag

Carruurta leh caqabadaha dhaqanka adag iyo hal xarakaad ee ADL waxay u qalmayaan 30 daqiqo maalintii ee daryeelka PCA-ga. Marka CFSS la fuliyo, waxey helayaan ugu yaran 75 daqiqadood.

Dadka qiimeynta qabta, wa maxay Xulashada MN MnCHOICES/PCA-ga/CFSS ee ay raadinayaan?

Qiimeeyuhu wuxuu go'aamiya haddii ilmahaagu dhamaystiri karo xarakaadka nolol-maalmeedka ADL, si madaxbanaani ah, ama in ilmuu u baahan yahay tilmaamo hadal oo joogto ah ama gacan laga geysto hawlaha.

Sideen ugu doodi karaa adeegyada PCA-ga/CFSS?

Waalid ahaan, ilmahaaga ada ugu aqoon badan. Haddii ilmahaagu u baahan yahay gacan-ku-heyn ama tilmaamo hadal oo joogto ah, waa inaad u sheegtaa qiimeeyaha. Waxaad u baahantahay in aad bixiso maclumaad faahfaahsan oo ku saabsan caqabadaha ilmahaaga, si loo go'aamiyo inta ADL ee ilmahaagu u yihiin, taaso keenta inay helaan saacadaha PCA/CFSS ee ilmahaagu baahanyihiin.

Maclumaad dheeraad ah: Booqo ilahayada Xarunta Maclumaadka Caafimaadka, si aad u hesho caawimada PCA-ga. PACER.org/health